Casharka 2

1. Maxaan halkan u imid?
-Inaan kuu sheego farriinta ugu muhiiman ee dunida.

2. Kuma ayey ka timid ama ay mirihiisa tahay farrinta ugu weyn ee dunida?
-Waa farriinta Ilaah.

3. Maxaa farriinta Ilaah ay u tahay tan ugu ahmiyadda weyn leh ee dunida?
-Waayo Ilaah weligii been ma sheegin.
-Waayo Ilaah kelidiis ayaa runta sheega.

4. Aaway farriintii Ilaah?
-Farriinta Ilaah waxay ku qoran tahay kitaabka Ilaah.

5. Sidee baa farriinta Ilaah ku soo gashay kitaabka Ilaah?
-Wakhti hore, Ilaah wuxuu doortay qaar ka mid ah dadka, oo wuxuu maankooda geliyey Hadalladiisa.
-Dabadeetana, raggaas waxay Hadalladii Ilaah ku qoreen, kutubkii Ilaah.

6. Miyaa raggaasu Hadalladooda ku qoreen kitaabak Ilaah?
-Maya.
-Raggaas Ilaah doortay waxay Hadallada Ilaah u qoreen isla sidii Ilaah ugu sheegay.

7. Miyaa raggaas qoray Hadallada Ilaah ay iyaga oo dhaniba noolaayeen isku wakhti?
-Maya.



8. Imisa sannadood bay qaadatay in la wada qoro oo la dhammaystiro Hadallada Ilaah?
-Waxay qaadatay 1600 oo sannadood.

9. Yey ahaayeen kuwii Ilaah u doortay in Hadalladiisa ay qoraan?
-Kuwii Ilaah u doortay inay Hadalladiisa qoraan waxay ahaayeen Yuhuud iyo hal nin oo Giriig ah.

10. Luuqaddee bay raggaasu ku qoreen Hadallada Ilaah?
-Waxay ku qoreen luuqadda Cibraaniga iyo weliba tan Giriigta.

11. Ilaa iyo imisa ayaa run ka ah Hadallada ku qoran kitaabka Ilaah.
-Iyagoo dhaniba waa run.

12. Maxaa ka dhigay ama keenay in Hadallada kitaabka ku qoran ee Ilaah oo dhan ay runwada noqdaan?
-Waayoo, Ilaah been ma sheego marnaba.
-Waayo Ilaah runta oo qura ayuu sheegaa.

-Maxaa la yiraahdaa hadallada kowaad ee Ilaah ku qoray kitaabkiisa?

-Hadallada kowaad ee Ilaah ku qoray kitaabkiisa ayaa loo yaqaannaa: "Kitaabka Bilowgii."

-Maxaa Hadallada kowaad ee Ilaah loogu qoray kitaabkiisa kowaad ee "Bilowgii?"

-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inaan garanno in wax waliba ay bilow leeyihiin.

-Miyaa wax waliba ee aynu aragno maanta ay bilow leeyihiin?
-Haa.
-Miyaa wax waliba ee aynaan arki karin ay bilow leeyihiin?
-Haa.

-Maxay noloshu la mid ahayd intaanay dunidu bilaaban ka hor?

-Bilowgii  ka hor, miyaa webiyo iyo harooyin ay jireen?
-Maya.
-Bilowgii ka hor, miyaa buuro iyo geedo jireen?
-Maya.

-Bilowgii ka hor bilowgii, ma qorrax baa jiri jirtay, mise dayax, mise xiddigo?
-Maya, waxba ma jiri jirin!

-Bilowgii ka hor, miyaa xayawaan iyo shimbiro ay jireen?
-Maya.
-Bilowgii ka hor, miyaa cirka iyo dhulkuba jireen?
-Maya.

-Haddaanay bilowgii jirin waxyaabahaas oo dhan, ma laga yaabaa inay dad jireen ka hor Bilowgii?
-Maya.

-Haddii aanay harooyin jirin, ama geedo, ama qorrax, ama cir, ama dhul bilowgii ka hor, miyaa dad ahlkaas ku noolaan karay wakhtigaas?
-Maya.

-Ka hor bilowgii, ma waxaa jiray dad caddaan ah ama kuwo madow ah?



-Maya.
-Ka hor Bilowgii, ma waxaa jiri jiray ruuxyo?
-Maya.
-Ka hor bilowgii, wax jiray lama arko.

-Bal aan kitaabka Ilaah idiinka akhriyo hadalkii kowaad ee kitaabkiisa ku qornaa, waxaana qorniinku leeyahay:

-Bilowgii waxaa jiray Ilaah.

-Maxaa Ilaah leeyahay, ama inoo sheegayaa?

-Ilaah wuxuu leeyahay bilowgii ka hore waxaa jiray Isaga ah Ilaaheenna oo qura.

-Waa kuma kii noolaa, ka hor Bilowgii?
-Ilaah.
-Bilowgii ka hor, waxaa jiray Ilaah oo keliya.

-Maaddaama Ilaah oo keliya uu noolaa ka hor Bilowgii, ya wax waliba ka weyn?
-Ilaah.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay webiyada, harooyinka.
-Maxaa ugu wacan?

-Waayo, Ilaah oo keliya ayaa noolaa ka hor bilowgii.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay buuraha iyo geedaha?
-Maxaa sabab u ah?

-Waayo Ilaah kelidiis ayaa jiray bilowgii.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay dhulka iyo cirka.
-Maxaa taasna sabab u ah?

-Waayo, Ilaah oo keliya ayaa noolaa ka hor bilowgii.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay qorrxda, dayaxa, iyo xiddigaha.

-Maxaa taana sabab u ah?
-Waxaa sabab u ah in Ilaah noolaa ka hor bilowgii.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay dhulka iyo cirka.

-Maxaa taasna sabab u ah?
-Waxaa taana sabab u ah, in Ilaah oo keliya noolaa ka hor bilowgii.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay dadka dunida oo dhan.

-Maxaa sabab u ah?
-Waxaa sabab u ah in Ilaah oo keliya noolaa ka hor bilowgii.

-Ilaah wuxuu ka weyn yahay ruuxyada dunida.
-Maxaa taana sabab u ah?

-Waxaa taas sabab u ah in Ilaah oo keliya uu jiray ka hor Bilowgii.

-Maaddaama Ilaah keliya uu noolaa ka hor bilowgii, waa kuma kan inoo sheegi kara wax ku saabsan bilowgii?
-Ilaah.

-Maxaa dadku ay u awoodi waayeen inay wax inooga sheegaan bilowgii?



-Waayo, bilowgii ka hor dad ma jirin.

-Maxaa ruuxyadu u awoodi waayeen inay wax inooga sheegaan Ilaah?
-Waayo ruuxyada weli lama samaynin.

-Goorma aya Ilaah bilowday ama uu koonka yimid?

-Ilaah bilow ma leh.
-Ilaah mar waliba wuu nool yahay.
-Ilaah waa Daa'im.

-Dadka qaar ayey la ahayd in Ilaah la dhalay.

-Haddaba Ma qof baa Ilaah dhali kara?
-Maya.

-Warku wuxuu ku jaran yahay in Ilaah daa'im yahay.
-Dadka qaarkii waxay la tahay in Ilaah isaga un is-dhao.

-Miyaa Ilaah dhalaa Ilaah kale?
-Maya.

-Warku wuxuu ku jaran yahay in Ilaah Baaqi yahay.
-Dadka qaarkii ayey la tahay in Ilaah qof kale sameeyey.

-Miyaa qofi Ilaah sameeyey?
-Maya.

-Ilaah waa Daa'im.

-Dadka qarkii waxay la tahay in Ilaah isa sameeyey.

-Miyaa Ilaah Ilaah sameeyaa?
-Maya.

-Warku wuxuu ku jaran yahay Ilaah waa daa'im.

-Miyey jirtay wakhti aanu Ilaah jirin?
-Maya.

-Ilaah mar waliba wuu noolaa.
-Ilaah mar waliba wuu nool yahay.

-Ilaah mar waliba wuu jiray.
-Mana jirin wakhti, aanu Ilaah jirin.

-Ilaah ma dhiman karo.
-Ilaah marnaba ma gaajoodo.
-Ilaah marnaba ma harraado.

-Dadku waxay u baahan yihiin biyo iyo cunto si ay u noolaadaan. Maxaa Ilaah u baahan yahay, si uu ku noolaado?

-Ilaah uma baahna sheey uu ku noolaado.

-Sidee buu Ilaah u nool yahay?
-Wuxuu ku nool yahay awooddiisa.

-Muxuusan Ilaah ugu baahnayn inuu ku kor socdo dhulka?
-Waayo, Ilaah wuxuu ku nool yahay awooddiisa.

-Muxuusan Ilaah ugu baahnayn qorraxda, si uu wax ku arko?
-Waayo, Ilaah wuxuu ku nool yahay awooddiisa.



-Muxuusan Ilaah ugu baahnayn cunto la cuno?
-Waayo, Ilaah wuxuu ku nool yahay awooddiisa.

-Muxuusan Ilaah ugu baahnayn, biyo la cabbo?
-Waayo, Ilaah wuxuu ku nool yahay awooddiisa.

-Miyaad awoodaysaa inaad ku noolaato meel aan lahayn dhul iyo qorrax?
-Maya, laakiin Ilaah waa awoodaa.

-Miyaad awoodaysaa inaad noolaato cunno iyo biyo la'aan?
-Maya, laakiin Ilaah waa awoodaa.

-Ilaah maahan sida dad oo kale.
-Ilaah maahan sida xayawaanka oo kale.
-Ilaah maahan sida ruuxyada oo kale.

-Waayo Ilaah oo keliya ayaa noolaa ka hor Bilowgii, Ilaah waxba uma baahna.

-Yaa ka weyn qorraxda, iyo dayaxa, iyo xiddigaha?
-Ilaah.
-Yaa ka weyn cirka iyo dhulka?
-Ilaah.
-Yaa ka weyn dadka oo dhan iyo ruuxyada oo dhan?
-Ilaah.

-Ma jiraan wax Ilaah ka weyn.
-Ma jiro mid Ilaah ka weyn.